

**Caawinaad ma u baahan tahay si aad u buuxiso foomkan?**

**Wac 1-844-882-7889 khadka bilaashka ah ama 711 (TTY) wixii taageero ah haddii aad u baahan tahay:**

- Turjumaan (adeeg lacag la'aan ah);
- Foomkan oo ku qoran luqadaha Af-Ingiriiska, Af-Ruushka, Vietnamese, luqada Shiinaha ee la Fahmi karo "Simplified Chinese" ama Soomaali;
- Foomkan oo ku qoran far waaweyn, cajaladaha la duubo, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaab kale;
- In laga jawaabo su'aalahaaga la xiriira foomkan.

**Ma rabtaa in aad soo sheegto kala takoor la sameeyay oo ka dhacay mid ka mid ah barnaamijyada Maamulka Caafimaad Oregon? Haddii uu jiro, buuxi foomkan.**

*Fadlan buuxi foomkan si aad u sheegto kala takoor la sameeyay oo ku salaysan midkasta oo ka mid ah waxyaalahani:*

- Dookha galmo;
- Is aqoonsiga qofka;
- Asalka;
- Midabka;
- Dalka laga soo jeedo,;
- Ku Hadalka Luqadda Af-Ingiriiska oo Yar;
- Diinta;
- Naafanimada;
- Da'da;
- Lab ama Dhedig ahaanshaha (jinsiyada);
- Uur lahaanshaha;
- Dhibaataayn galmo;
- Xaalada guur;
- Aargoosiga la xiriira gudbinta warbixin ku saabsan kala takoor; ama waxyaalaha kale ee sharcigu
- Xuquuq ahaan dhowray (macluumaad dheeraad ah fiiri Xeerarka Maamulka Oregon 943-005-0000 ilaa 943-005-0070).

*Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) Xafiiska Sinaanta iyo Ka Qeyb gelinta (OEI) wuxuu si taxadir leh dib ugu eegi doonaa macmuulaadka ku qoran foomkan.*

*Waxaad warqad nagaga heli doontaa mudo aan ka badnayn toddoba maalmood ka dib markaan helno foomka. Waxaan kuu sheegi doonaa in aanu helnay warbixintaadii kala takoorka la xiriirtay iyo haddii OEI uu leeyahay awood uu wax kaga qabanayo.*

*Haddii OEI ayna waxka qaban karin warbixintaada, waxaan kuu sheegi doonaa xafiiska waxka qaban kara.*

*Waxaa laga yaabaa in aan u baahano ogolaanshahaaga si aanu u isticmaalno magacaaga inta uu socdo baaritaanku. Fadlan akhri, saxiix waxaanad foomkaaga Warbixinta Kala Takoorka u geysaa Maamulka OHA ee Isticmaalka iyo Bixinta Macluumaadka. (Ogolaanshahan waxaa laga helayaa halka dambe ee warqadan.)*

*Siyaasada OHA ayaa dhigaysa in aanan lagu cabsi galin, hanjabaad lagu geysan, wax lagugu khasbin, lagu takoorin ama lagaaga aargoosan gudbinta aad gudbisay warbixinta kala takoorka la xiriirta.*

#### **FADLAN OGOW:**

**In gudbinta Warbixinta Kala Takoorka la xiriirtaa ay ka duwan tahay codsi rafcaan ama dhegeysi maxkamadeed haddii aad hesho Ogaysiiska Talaabo Qaadida 'Notice of Action' oo kuu diidaya adeegyadaada caafimaad.** Warbixintan Kala Takoorka wax xiriir ahi kama dhexeeyo Ogaysiiska Talaabo Qaadida 'Notice of Action' ama Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka 'Notice of Appeal Resolution'.

Haddii aad hesho Ogaysiiska Talaabo Qaadida 'Notice of Action' oo diidaya codsigaagii adeegyada caafimaad, waxaad CCO/qorshahaaga caafimaad ka codsan kartaa rafcaan, ama waxaad OHA ka codsan kartaa dhegeysi maxkamadeed, ama waxaad codsan kartaa labbadoodaba. Waa in aad Foomkaaga Codsiga Dhegeysiga Maxkamadeed ku dirtaa **45 maalmood** gudahood laga billaabo "taariikhda ogaysiintan".

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan rafcaanka ama dhegeysiga maxkamadeed, waxaad fiirisaa Qorshaha Caafimaadka Oregon ee Tilmaanta Macmiilka ee Xaashida 4 – Rafcaanka iyo Dhegeysiga Maxkamadeed ee <https://apps.state.or.us/Forms/Served/he9040d.pdf>. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Qorshaha Caafimaadka Oregon Qaybta Adeegyada Macmiilka 1-800-273-0557 ama 711 (TTY).

**Macluumaadka ku saabsan Warbixinta Kala Takoorka**

**Fadlan daabac ama kambiyuutarka ku qor — ku lifaaq wixii bogag dheeraad ah, haddii loo baahdo.**

Taariikhda: \_\_\_\_\_

**1A.** \_\_\_\_\_

Magaca qofka la kulmay kala takoorka dhacay

\_\_\_\_\_

Cinwaanka	Magaalada	Gobolka	ZIP code-ka
-----------	-----------	---------	-------------

\_\_\_\_\_

Telefoonka guriga / telefoonka gacanta	Telefoonka shaqada	Kuwo kale
--	--------------------	-----------

\_\_\_\_\_

Taariikhda dhalasho	OHP # (haddii uu jiro)	Luqadda la doorbidayo
---------------------	------------------------	-----------------------

Habkeed rabtaa in aan kuula soo xiriirno?  Telefoon  Email  Hab kale

Wakhtiga u haboon ee lagula soo xiriiri karo: \_\_\_\_\_ (Maalinta/wakhtiga)

Ma kugula soo xiriiri karnaa email?  Haa  Maya Email-ka: \_\_\_\_\_

**Haddii aad warbixintan kala takoorka la xiriirta oo uu qofkale leeyahay aad gudbinayso, fadlan buuxi macluumaadka hoos ku qoran:**

**1B.** \_\_\_\_\_

Magaca qofka buuxinaya foomkan ee la kulmay kala takoorka dhacay

\_\_\_\_\_

Cinwaanka	Magaalada	Gobolka	ZIP code-ka
-----------	-----------	---------	-------------

\_\_\_\_\_

Telefoonka guriga / telefoonka gacanta	Telefoonka shaqada	Kuwo kale
--	--------------------	-----------

\_\_\_\_\_

Luqadda la doorbidayo

Habkeed rabtaa in aan kuula soo xiriirno?  Telefoon  Email  Hab kale

Wakhtiga u haboon ee lagula soo xiriiri karo: \_\_\_\_\_ (Maalinta/wakhtiga)

Ma kugula soo xiriiri karnaa email?  Haa  Maya Email-ka: \_\_\_\_\_

**2. Fadlan nasii macluumaadka ku saabsan qofka/kooxda/hay'adda/xafiiska aad aaminsan tahay inay gaysteen kala takoorka.**

Magaca(magacyada)

Lambarka telefoonka (haddii la garanayo)

Magaca hay'adda ama waaxda/goobta dhismaha ama xaruntu ku taalo

Taariikhda(taariikhihii) u dambaysay markii uu dhacay kala takoorku

Kala takoorku ma wuxuu dhacay 180 maalmood ka hor?

Haa  Maya

Haddii ay jawaabtu tahay haa, fadlan noo sheeg sababta aad hada u gudbinayso Warbixinta Kala Takoorka:

**3. Ma laguu diiday in aad gasho xarunta ama dhismaha?  Haa  Maya**

Magaca dhismaha/xarunta

Cinwaanka jidka

Magaalada

Gobolka

ZIP code-ka

**4. Ma laguu diiday in aad gasho ama ka qayb qaadato barnaamij, adeeg ama hawl la qabanay?  Haa  Maya**

Haddii ay jawaabtu haa tahay, fadlan buuxi macluumaadka hoos ku qoran:

Magaca barnaamijka

Taariikhda

Wakhtiga

**5. Noo sheeg waxa dhacay. Fadlan raaci macluumaadka hoos ku qoran:**

- Liiska magacyada dhamaan dadka ku lug yeeshay arinta, oo ay la socdaan magacyada hore iyo kuwa dambe iyo cinwaanada, haddii la garanayo;
- Hadalada saxda ah ama ficilada dadkii ku lug yeeshay arinta;
- Magaca(magacyada);
- Wakhtiga(wakhtiyada);
- Macluumaadka meesha la iskala soo xiriirayo, haddii la garanayo, qof kasta.

**6. Markhaatiyada:**

Qor magaca buuxa ama macluumaadka qof kasta oo arkay ama maqlay kala takoorka dhacay. Fadlan bixi macluumaadka u badan ee aad bixin karto ee suuragalka ah.

---

---

---

---

---

---

**7. Ma isku dayday in aad xaliso dhibaataada ama qof kale ma kala xiriirtay warbixintaada?**

Haddii ay jawaabtu haa tahay, ayaad la xiriirtay? Maxaa dhacay?

---

---

---

---

---

---

**8. Maxaad rabtaa in laga yeelo warbixintan?**

---

---

---

---

---

---

**9. Ma aaminsan tahay in ka mid ahaanshahaaga dabaqada sharcigu dhowray ee aan la bar-tilmaameedsan karin 'protected class' awgeed kala takoor laguugu sameeyay?**

Haa  Maya

Haddii ay jawaabtu haa tahay, fadlan calaamadee dhamaan sanduuqyada ku khuseeya.

- |  |  |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Da'da                                 | <input type="checkbox"/> Diinta  |
| <input type="checkbox"/> Naafanimada                           | <input type="checkbox"/> Uur lahaanshaha   |
| <input type="checkbox"/> Lab ama Dhidig ahaanshaha (jinsiyada) | <input type="checkbox"/> Dhibaatayn galmo  |
| <input type="checkbox"/> Xaalada guur                          | <input type="checkbox"/> Aargoosiga la xiriira gudbinta Warbixinta Kala Takoorka |
| <input type="checkbox"/> Dalka laga soo jeedo                  | <input type="checkbox"/> Ku Hadalka Luqadda Af-Ingiriiska oo Yar                 |
| <input type="checkbox"/> Asalka                                | <input type="checkbox"/> Dookha galmo  |
| <input type="checkbox"/> Midabka                               | <input type="checkbox"/> Is aqoonsiga qofka                                      |
| <input type="checkbox"/> Kuwo kale: _____                      |  |

**OGOW: Haddii dabaqadaada sharcigu dhowray ee aan la bar-tilmaameedsan karin 'protected class' ee (kor ku qoran) ayna ahayn sababta kala takoorkaaga laguugu sameeyay, waxaan warbixintaada u diri doonaa xafiiska ku haboon.**

Foomkan waxaa buuxiyay:

Qofka loo geystay kala takoorka

Qareen/wakiil/u doode

Shaqaale ka tisan OHA: \_\_\_\_\_

Kuwa kale (*fadlan si gaar ah u sheeg*): \_\_\_\_\_

Macluumaadka foomkan ku qoran waxaa lagu helay:

Telefoon ahaan  Shakhshi ahaan  Email ahaan  Fagas (fax) ahaan

Siyaabo kale (*fadlan si gaar ah u sheeg*): \_\_\_\_\_

**Fadlan wixii macluumaad ah ee kale ku lifaaq Warbixinta Kala Takoorka.**

**FADLAN FOOMKAN KU SOO HAGAAJI:**

**OHA Office of Equity and Inclusion**

**Diversity, Inclusion and Civil Rights Manager**

421 S.W. Oak St., Suite 750, Portland OR 97204

Fax-ka 971-673-1330 ama email u dir OHA.PublicCivilRights@state.or.us

Khadka bilaashka ah: 1-844-882-7889 (codka) ama 711 (TTY)

**Waxaad sidoo kale leedahay xuquuqda aad cabasho ugu gudbin karto midka mid ah hay'adaha soo socda adigoo ku gudbinaya mudo 180 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka uu kala takoorku dhaco:**

**U.S. Department of Justice Civil Rights Division**

950 Pennsylvania Ave., N.W., Washington, D.C. 20530

[www.justice.gov/crt/complaint/](http://www.justice.gov/crt/complaint/)

1-888-736-5551 (codka) ama 202-514-0716 (TTY)

**Michael Leoz, Maamulaha Heer Gobol**

Office for Civil Rights

U.S. Department of Health and Human Services

90 7th Street, Suite 4-100

San Francisco, CA 94103

Xarunta Jawaabta Macmiilka: (800) 368-1019

Fax-ka: (202) 619-3818

Qalabka lsgaarsiinta ee Dhagoolayaasha (TDD): (800)-537-7697

Email-ka: [ocrmail@hhs.gov](mailto:ocrmail@hhs.gov)

**Waxaad sidoo kale leedahay xuquuqda aad cabasho ku gudbin karto mudo hal sano gudahood ah kaasi oo la xiriira kala takoorka lagugu sameeyay adigoo u gudbinaya:**

**Oregon Bureau Of Labor and Industries (BOLI)**

800 N.E. Oregon St., Suite 1045, Portland, OR 97232

[www.oregon.gov/boli/CRD/Pages/C\\_Crcompl.aspx](http://www.oregon.gov/boli/CRD/Pages/C_Crcompl.aspx)

971-673-0764 (codka) ama 711 (TTY)



Foomkan waxaa la helayaa isagoo nooc kale ah oo ay ka mid yihiin farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, kambuutir diskiga iyo hadal jeedin dhinaca afka ah.

Magaca dambe ee sharciga ah ee macmiilka/codsadaha:	Hore:	Dhexe:	Taariikhda dhalasho:
Magacyada kale ee u isticmaalo macmiilku/codsaduhu:	Lambarka aqoonsiga dacwada:		

Saxiixada aan saxiixayo foomkan, waxaan diiwaan hayaha u ogolaanayaa in uu bixiyo macluumaadka sirta ah ee sida gaarka ah aniga iigu saabsan:

Qaybta A	Macluumaadka laga helayo diiwaan hayaha: <i>(qofka, dugsiya, shirkadda, hay'ada, caafimaadka ama daryeel bixiyaha kale)</i>	Macluumaadka gaarka ee ay tahay in la bixiyo:	Heshiis lagu yahay in la isdhaafsado: Haa/Maya
<p>Haddii macluumaadku ka kooban yahay mid kasta oo ka mid ah noocyada diiwaan ama macluumaad ee hoos ku qoran, sharcio dheeraad ah oo la xiriira isticmaalka iyo bixinta macluumaad ayaa suuragal ah in loo baahdo. Waxaan fahamsanahay in macluumaadkan aan la bixin doonin ilaa xarfaha magacygu ka bilaabmo aan ku qoro meesha banaan ee ku xigta macluumaadka maahane:</p> <p>HIV/AIDS: _____ Caafimaadka dhimirka: _____ Baaritaanka hidaha la xiriira: _____</p> <p>Waxka ogaanshaha aalkolada/daroogada, daawaynta, gudbinta:</p>			

Qaybta B	Cida Macluumaadka la siinayo: <i>(cinwaan baa loo baahan yahay haddii boosta lagu diray)</i> . Haddii macluumaadka la siinayo koox, qor xubnaha.	Ujeedada:	Taariikhda uu ku eg yahay macluumaadku ama dhacdadu*:

\*Ogolaanshahan waxaa loogu tala galay hal sano laga bilaabo taariikhda la saxiixo iyadoo si gaar ah wakhti loo tilmaamo maahane. Wakhti kasta ayaan joojin karaa ogolaanshahani. Joojintu wax saameyn ah ku yeelan mayso wixii macluumaad ah ee isla hadaba la bixiyay. Waxaan fahamsanahay in sharciga gobolka iyo federaalku ay dhowraan macluumaadka ku saabsan dacwadayda. Waxaan fahamsanahay ujeedada heshiiskani waanan ogolaaday in macluumaadka la bixiyay la soo qoro. Waxaan saxiixayaa ogolaanshahani anigoo xor ah. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka la isticmaalay ee la bixiyay sida ku tilmaaman ogolaanshahani in ay suuragal tahay mar dambe la bixiyo iyadoo aanu hada ka dib dhowraynin sharciga federaalka ama gobolku. Sidoo kale waxaan fahamsanahay in sharciga federaalka ama gobolku ay mamnuucayaan dib u bixinta macluumaadka la xiriira HIV/AIDS, caafimaadka dhimirka iyo waxka ogaanshaha aalkolada/daroogada, daawaynta, diiwaanada tababarka dhaqin celinta la xiriira ama wixii gudbin ah iyadoo la haysto ogolaansho gaar ah maahane.

Qaybta C	Saxiixa sharciga ah oo dhammeystiran ee shakhsiga ama qofka wakiilka ah ee la oggolyahay:	Xiriirka lala leeyahay macmiilka:	Taariikhda:
	Magaca qofka shaqaalaha ah <i>(daabac)</i> :	Magaca waaxda bilowday/goobta:	Taariikhda:
	Saxiixa sharciga ah oo dhammeystiran ee shaqaalaha waaxda ee samaynaya nuqulada:	Kani waa nuqulka runta ah ee qoraalka ogolaanshihii rasmiga ahaa.	
	Daabac magaca qofka shaqaalaha ah:		

## Macluumaadka looga baahan yahay macmiilka

**Si loo siiyo ama loo bixiyo adeegyo caafimaad:** Haddii Waaxda Adeegyada Dadweynaha (Department of Human Services - DHS) ama Maamulka Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority - OHA) ay u dhaqmayaan in ay yihiin kuwa **bixiya**adeegyadaada daryeelka caafimaad ama ay bixinayaan adeegyadani hoos yimaada Qorshaha Caafimaadka Oregon ama Barnaamijka Medicaid, waxaad dooran kartaa in aadan saxiixin foomkan. Doorashada aad doorato taasi **saameyn xun** ku yeelan mayso awooda aad u leedahay in aad hesho adeegyo caafimaad, *iyadoo* ay adeegyada daryeelka caafimaad ay ujeedadoodu kaliya tahay in qofkale la siiyo macluumaad caafimaad maahane oo uu ogolaanshuhuna uu yahay mid lagama maarmaan ah si loo bixiyo macluumaadkaasi. *(Tusaalooyin ka mid ah kuwani waxay noqon karaan qiyaasaha, tijaabooyinka ama qiimaynta la samaynayo.)* Doorashada aad doorato in aadan saxiixan **waxaa suuragal ah in ay saameysan ku yeelatobixinta** lacagta adeegyadaada haddii ogolaanshahani uu yahay mid muhiim u ah in ay lacag soo celiyaan caymis bixiyayaasha gaarka ah ama hay'adaha aan dowliga ahayni. Ogolaanshahan isticmaalka iyo bixinta macluumaad **waxaa sidoo kale suuragal ah in uu muhiim yahay** marka ay jiraan xaaladahani soo socdaa:

- Go'aaminta in aad u qalanto isqoridda qaarka mid a barnaamijyada caafimaad ee bixiya daryeelkaaga caafimaad
- Go'aaminta in aad u qalanto barnaamijka iyo adeegyada kale ee DHS ama OHA ee aanan u dhaqmaynin in ay yihiin daryeel caafimaad bixiye

**Kani waa foom aan shardi ahayn.** DHS ama OHA ma beddeli karaan sharciga daawaynta, bixinta lacagta ama isqoridda barnaamijyada daryeelka caafimaadka ee dowladdu maalgeliso ee ku saabsan saxiixida ogolaanshahan, marka laga reebo laga sida kor lagu qeexay. Si kastaba ha ahaatee, waa in lagu siiyaa macluumaad sax ah oo ku saabsan sida diidmada bixinta ogolaanshaha macluumaad ay saameyn xun ugu yeelan karto go'aan ka gaarida u qalmida ama maamulka adeegyada. Haddii aad go'aansato in aadan saxiixin, waxaa suuragal ah in lagu gudbiyo adeeg kaliya oo laga yaabo in uu caawiyo adiga iyo qoyskaaga iyadoo aan wax macluumaad ah la isdhaafsan.

---

## Isticmaalida foomkan

1. **Weedhaha la isticmaalay: Heshiis lagu yahay in la isdhaafsado:** Kalmada "haa" waxay ogolaanaysa in macluumaadka la isdhaafsado oo uu isaga gudbo diiwaan hayaha iyo dadka ama barnaamijyada ku qoran ogolaanshaha. **Koox:** Tiro dad ah ama hay'ado si caadi ah u wada shaqeeya. Dadka ka tirsan koox waa in lagu tilmaamaa foomkan.
2. **Taageero:** Markasta oo ay suuragal tahay, shaqaalaha DHS ama OHA waa in ay kula buuxiyaan foomkan **Waxaad xaqiijisaa in aad fahamsan tahay foomka ka hor inta aadan saxiixin.** Ha ka gaabsan in aad waydiiso su'aalaha ku saabsan foomka iyo wuxuu ogolyahay. Waxaa suuragal ah in aad saxiixaagii caadiga ahaa ku beddesho astaan saxiix oo kale ama aad **qof** la ogolyahay ka codsato in uu saxiixo isagoo kaa wakiil ah.
3. **Mas'uuliyada/haysashada qof:** Haddii qofka saxiixaya foomkan uu yahay qof wakiil ah, sida daryeela, nuqul warqadaha sharciga ah oo cadaynaya awooda uu wakiilku ku saxiixo karo ogolaanshahan waa in lagu lifaaqaa foomkan. Si taasi la mid ah, haddii hay'ad leedahay xuquuqda hayshasho oo uu wakiilkoodu saxiixo, awooda ay u leeyihiin in ay wax haysan karaa waa in lagu lifaaqaa foomkan.
4. **Joojinta:** Haddii aad wakhti dambe rabto in aad joojiso ogolaanshan, la xiriir shaqaalaha DHS ama OHA. Qof kooxda ka tirsan waad ka saari kartaa foomkan. Waxaa lagaa codsan doonaa in aad codsiga joojinta aad qoraal ahaan kusoo gudbiso. Waxyaalaha ka reebaya: Xeerarka federaalka uma baahna in joojintu noqoto qoraal marka laga hadlayo Barnaamijyada Daroogada iyo Aalkolada. Macluumaad dheeraad ah lama bixin karo ama lama codsan karo marka ogolaanshaha la joojiyo ka dib. DHS ama OHA way sii wadi karaan isticmaalida macluumaadka ay heleen joojinta ka hor.
5. **Dadka yar yar:** Haddii aad tahay qof yar, waxaad ogolaan kartaa bixinta macluumaadka caafimaadka dhimirka ama ku xadgudubka mukhaadaraadka haddii aad tahay 14 jir ama ka wayn tahay; bixinta wixii macluumaad ah ee la xiriira cudurada laysku iskugu gudbiyo galmada ama waxyaalaha la iskaga ilaaliyo uur qaadida waad ogolaan kartaa iyadoo ayna ku xirnayn da'daada; bixinta wixii macluumaad ah ee la xiriira macluumaadka caafimaad ee guud waad ogolaan kartaa haddii aad tahay 15 jir ama ka wayn tahay.
6. **Fiiro gaar ah in loo yeesho:** Wixii macluumaad ah ee la xiriira **HIV/AIDS, caafimaadka dhimirka, baaritaanka hidaha ama daawaynta isticmaalka aalkolada/daroogada**, ogolaanshuhu waa in uu si cad u tilmaamaa macluumaadka gaarka ah ee laga yaabo in la bixiyo iyo ujeedadiisa.

**Dib u bixinta Macluumaad:** Xeerarka federaalka ee (42 CFR qaybta 2) ayaa mamnuucaya in la bixiyo waxyaalo dheeraad ah ee la xiriira macluumaadka aalkolada iyo daroogada; sharciga gobolku wuxuu mamnuucayaa bixinta dheeraadka ah ee la xiriirta macmuulaadka HIV/AIDS (ORS 433.045, OAR 333-12-0270); iyadoo sharciga gobolku mamnuucayo bixinta dheeraadka ah ee la xiriirta macmuulaadka caafimaadka dhimirka, daawaynta ku xadgudubka mukhaadaraadka, tababarka dhaqin celinta iyo naafanimada koriinka ee laga helo barnaamijyada dowladdu maalgeliso (ORS 179.505, ORS 344.600) iyadoo aanu jirin ogolaansho gaar ah oo qoraal ah.

**Fiiro Gaar ah:** Barnaamijyadii iyo adeegyadii caafimaad ee Oregon waa laga soo wareejiyay Waaxda Adeegyada Dadweynaha (DHS) iyadoo loo wareejiyay Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA). DHS way sii wadi doontaa go'aanka gaarida u qalmida kuwo badan oo ka mid ah barnaamijyada caafimaad, iyo barnaamijyada kale ee ay maamusho DHS.